**SIDEE AYAAN KU HELAA DARYEELKA ILMAHA?**

# Meeqa sanno ayuu jiraa ilmahaagu?

## 0-4 sanno

childcarechoices.me

Raadso daryeelka ilmaha adiga oo adeegsada da'da, goobta, iyo adiga oo fiiriya qiimeynta tayada. Ha gaffin talooyinka lagu helo daryeelka cunugga ee u fiican qoyskaada. Isticmaal filtarka kabidda haddii ay kula tahay in aad xaq u leedahay.

Haddii aad qabtid dhallaan ama aad fileysid in uu kuu dhasho cunug, waxaa wanaagsan in aad iska qortid 3 liisaska sugitaanka bacdamaa ay kooban yahiin boosaska.

### Ma u baahan tahay kaalmo si aad u bixisid daryeelka cunugga?

#### Maya

Ma waxaad raadineysaa in aad heshid xoogaa dhaqaalo In badan ka ogow Childcare FSA* ama Bixiyeyaasha Tayada (Quality Providers) adigoo ka hel tixgelinta canshuurta daryeelka cunugga.

#### Haa

##### Adiga ma qaadataa TANF?

###### Haa

Weydii maamulaha kiiskaga ASPIRE/TANF sida loo helo u gudbinta **FEDCAP***

(844)-562-0190

www.fedcapmaine.org

*Dadka shaqeeya xaq uma laha FEDCAP, balse waxay qaadan karaan Xanaanada ilmaha Ku Meelgaarka (TCC, Transitional Child Care) ama barnaamijyada kale ee DHHS.

###### Maya

**Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha**

(207) 822-2000

https://www.maine.gov/dhhs

Waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid TANF ama barnaamijyo kale taasoo ku xiran dakhligaada.

**CCSP**:**

Waxaad isticmaali kartaa CCSP xagga qoyska, asxaabta, iyo daryeelka deriska ama bixiyaha daryeelka cunugga.Waxaa dhici karto in qaar ka mid ah bixiyeyaasha daryeelka cunugga ay kaa kaalmeyaan hawsha arjiga.

**https://www.maine.gov/dhhs/ocfs/ec/occhs/step.htm**

** Xayiraadaha muwaadinnimada ayaa saameyn ku yeelan kara u-qalmitaanka.

##### Ma kula tahay in adiga laguu arki karo in aad tahay qof dakhli yar?

###### Haa ama maya

**Early Head Start Childcare**
**6 todobaad-3 sanno**
(207) 553-5811
www.opportunityalliance.org/early-childhood-education
**Maalinta buuxda/Sannadka buuxa**

Guri laaweyaasha, SSI, korinta cunugga, iyo qaateyaasha TANF, waxay toos u leeyahiin xaq marka la fiiriyo dakhligooda.

###### Haa

**Head Start*****
**3-5 sanno**
(207) 553-5811
opportunityalliance.org
**Qeyb maalinta/Qeyb sannadka**

**Head Start Childcare**
**3-5 sanno**
(207) 553-5811
www.opportunityalliance.org/centerbased-childcarehead-start
**Maalinta buuxda/Sannadka buuxa**

*** Ma jiraan sharuudo ku xeran dhallashada waddanka ama daggitaanka, balse si loo helo xaq u yeelasho buuxdo oo la xariirto adeegyada waa in xaq loo leeyahay CCSP.
Kaddib marka aad la kullantid xaq u yeelashada Bilowga Hore (Head Start), waxaad mar kasta xaq u leedahay brograamyada.

## 4-5 sanno

- Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay 4 sanno jirka siiyaan brograamka Pre-K, balse waxaa muhiim ah in horay leysugu qoro bacdamaa caruurta lagu xullo bakhtiyaa nasiib.
- Bilowga Hore (Head Start) waa fursad la siiyo qoysaska dakhliga yar! (fiiri hoos)

## 5-12+ sanno

Waxbarashada Dadweynaha: Portland Public Schools
Dugsiyada Gaarka: St. Bridget, Breakwater, Waynflete, etc

### Dibadda ka ah Dugsiga*

*Dibadda ka ah dugsiga waxaa loola jeedaa dugsiga ka hor ama kaddib iyo maalmaha fasaxa iyo fasaxyada la qaato.

#### Daryeelka cunugga

- Hel qof daryeelo cunugga adiga oo adeegsada Nextdoor ama Care.com
- Wac saaxiib ama deris
- In Her Presence
- Kooxda Facebook: Maine Childcare

#### Fasaxa dugsiga

- Parks and Recreation
- www.portlandyouth.org

#### Ka hor/kaddib

- La xariir barnaamij madadaalada dugsigaada. Waxaa la heli karaa kabidda.
- www.portlandyouth.org

**CCSP waxay caruurta jirta ilaa 12 sanno ku kaalmeyn karaan xulashada qaar ee ku qoran kor:**
www.maine.gov/dhhs/ocfs/ec/occhs/step.htm

***Si aad u heshid ilo badan, booqo: www.portlandofopportunity.com/how-do-i-in-portland-maine***

# Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

**Maxay tahay Tayada Daryeelka?** Quality for ME waxaa abuuray Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services) si waalidiinta loo siiyo hab fudud ay ku aqoonsadaan brograamyada waxbarashada caruurnimada hore ee tayada sare. Nidaamka qiimeynta wuxuu ku saleysan yahay afar talaabo, talaabo kasta waxay u horseedi doontaa tayo sare. Talaabada Afaraad waa talaabada ugu sareyso uu barnaamij/bixiyahu fullin karo. Dhamaan barnaamijyada daryeelka ilmaha shattiyada haysta ee ku sugan Maine - daryeelka caruurta qoyska, xarumaha daryeelka cunugga, barnaamijyada da'da-dugsiga - waxay xaq u leeyihiin in ay ka qeybgalaan.

**Maxay tahay TANF?** TANF waxay u taagan tahay Kaalmada Ku Meelgaarka ee la siiyo Qoysaska u Baahan (Temporary Assistance for Needy Families). Barnaamika TANF, ee waqtiga kooban, wuxuu kaalmeyaa qoysaska haysta caruurta marka waalidiinta ama qaraabada kale ee mas'uulka ah aysan bixin karin baahiyaha aasaasiga ee qoyska. Dawladda Federaalka waxay gobolada siisaa deeq ay ku fulliyaan barnaamijka TANF.

**Maxaa loola jeedaa Daryeelka Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska?** Inta quseeyso qoysas badan, xullashada habboon waxay tahay marka xubin ka tirsan qoyska ama deriska uu bixiyo daryeelka cunugga. Daryeelka cunugga noocaan waxaa lo yaqaan "mid aan rasmi ahayn," "laga dhaafay shattiga," ama "Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska (FFN)." Badanaa, daryeelka noocaan waxaa bixiya qof daryeela labo cunug ama ka yar, aan qaraabo la ahayn bixiyaha daryeelka. (Haddii uu jiro qof xanaaneeya in ka badan 2 caruura, aan qaraabo la ahayn iyaga, markaas waxay u baahan yahiin in ay qaataan shatti.)

**Maxay tahay Xisaabta Kharashka Dabacsan (FSA, Flexible Spending Account)?**
Sida FSAyada kale, daryeelka ku tiirsanaanta FSA waxay kuu ogoshahay in aad xisaabtaada ku maalgelisid doolarka inta aan weli la canshuurin. Hase ahatee xisaabtaan waxaa loogu talogalay kharashka ku baxa caruurta iyo qaangaarka xaq u yeesha.Tani waxaa ka mid ah caruurta aan weli gaarin dugsiga, dugsiga xanaanada, daryeelka maalinta, daryeelka dugsiga ka hor iyo kaddib, iyo xerada maalinta kuleylaha. Waa daryeelka qoyskaada u baahan yahay, inta aad ku sugan tahay shaqada.

**Maxay u shabahaan sharuudha xaq u yeelashada dakhliga?**
Tusaaladaan ka qaado CCSP.

**Is your income below 250% Federal Poverty Level (FPL)?**

| Household Size | Weekly Income |
|---|---|
| 1 | $619 |
| 2 | $836 |
| 3 | $1,053 |
| 4 | $1,270 |
| 5 | $1,487 |
| 6 | $1,704 |
| 7 | $1,921 |
| 8 | $2,138 |
| 9 | $2,355 |
| 10 | $2,573 |
| 11 | $2,789 |
| 12 | $3,006 |

*(please note this chart changes annually)*

**Is your income at or below 85% of the State Median Income (SMI)?**

| Family Size | Weekly Income |
|---|---|
| 1 | $766.43 |
| 2 | $1,002.25 |
| 3 | $1,238.08 |
| 4 | $1,473.90 |
| 5 | $1,709.72 |
| 6 | $1,945.55 |
| 7 | $1,989.55 |
| 8 | $2,033.98 |
| 9 | $2,078.20 |
| 10 | $2,122.40 |

*(please note this chart changes annually)*

PORTLAND of Opportunity

starting STRONG

RESURGAM. CITY OF PORTLAND, MAINE

outh & Family Outreach

Catherine Morrill DAY NURSERY

maineaeyc
Maine Association for the Education of Young Children

the Opportunity Alliance

Department of Health and Human Services

MAINE ROADS TO QUALITY
PROFESSIONAL DEVELOPMENT NETWORK

In Her Presence
Out of the Shadows and Onto the stage

Child Care Choices

FEDCAP inc
Serving Maine